



Golaha Wakiilada JSL Oo Cod Aqlabiyad ah ku Meelmariyey odoroska Miisaaniyada 2021-ka Oo 4.8% Ka badan Miisaaniyad-sanadeedkii 2020-ka.

◆ Madaxwaynaha JSL oo ka hadlay muhiimada ay Qaranka u leeyihii bixinta-cashuurta iyo isla-xisaabtanku.

◆ Nuxurka Khudbadii Wasiirka H. Maaliyadda JSL U Jeediye golaha Wakiiladda Oo Uu Kaga Warbixiyey Odoroska Miisaaniyad-sanadeedka 2021-ka Oo Ah Miisaaniyad-dhamaystiran.

◆ Kulan-Hawleedka Dejinta Qorshe-sanadeedka 2021-ka Ee Wasaaradda H. Maaliyadda JSL

Content

- 2** Golaha Wakiilada JSL Oo Cod Aqlabiyad ah ku Meelmariyey odoroska Miisaaniyada -2021ka Oo %4.8 Ka badan Miisaaniyad-sanadeedkii -2020ka
- 3** Nuxurka Khudbadii Wasiirka H. Maaliyadda JSL U Jeediyey golaha Wakiiladda Oo Uu Kaga Warbixiyey Odoroska Miisaaniyad-sanadeedka -2021ka Oo Ah Miisaaniyad-dhamaystiran
- 14** Golaha Wakiilada JSL Oo Ansixiyey Kaabis-Miisaaniyaddeed (Supplementary Budget) -2019Ka Oo Ay U Soo Gudbisay Wasaaradda H. Maaliyaddu
- 15** Madaxwaynaha JSL oo ka hadlay muhiimada ay Qaranka u leeyihiin bixinta-cashuurta iyo isla-xisaabtanku
- 20** Wasiirka H. Maaliyadda JSL Oo Daah-Furay Kulan-Hawleed ku Saabsan Dooda Hindisaha Qabyo-Qoraalka Xeerka Aaga Ganacsiga ka Caagan (Special Economic Free Zone Act)
- 21** Wasaaradda H. Maaliyadda JSL oo Daahfurtay barnaamijka Casriga Ah Oo Cashuur-bixiyayaasha U Sahlaya Inay Online Ku Bixiyaan cashuurta ku waajibtay
- 21** Wasaaradda H. Maaliyadda JSL oo Daahfurtay barnaamijka Casriga Ah Oo Cashuur-bixiyayaasha U Sahlaya Inay Online Ku Bixiyaan cashuurta ku waajibtay
- 23** Madaxwaynaha JSL Oo Si Qoto-dheer uga Hadlay Mihiimadda Barnaamijka Dib u habaynta Maamulka Maaliyadda Ee Wasaaradda H. Maaliyaddu Wado
- 24** Wasiirka H. Maaliyadda JSL Oo xadhiga ka jaray xafiis ay Waaxda Cashuuraha Berrigu ku yeelan doonto xarunta rugta ganacsiga Somaliland
- 25** Wasiirada Horumarinta Maaliyadda Iyo Gaadiidka JSL Oo Si Wada Jir Ah Xadhiga Uga Jaray Xafiis Fududayn Doonna Ageegyada Buugta Gaadiidka Iyo Balaydhada Luma
- 28** Wasiirka H. Maaliyadda JSL Oo Xadhiga Ka Jaray Qaybo Cusub Oo Lagu Soo Kordhiyey Gegida Dayuuradaha Ee Cigaal
- 28** Dar-Dar Galinta Hawlaha Casriyeynta Xisaab-Xidhka Iyo Guud Ahaan Barnaamijka Dib-U-Habaynta Maamulka Maaliyadda Dalka
- 29** Mihiimadda Xafiisyadda Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Ka Furatay Wasaaraddaha Cadaaladda Iyo Hawlaha Guud Iyo Waliba Laamaha Bangiga Dawladda
- 31** Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Tababar Mihiim Ah U Soo Xidhay 35 Xubnood Ka Kala Socday Hantidhawrka Gudaha Ee Wasaaradaha Iyo Hay'adaha Dawladda Somaliland

Golaha Wakiilada JSL Oo Cod Aqlabiyad ah ku Meelmariyey odoroska Miisaaniyada 2021-ka Oo 4.8% Ka badan Miisaaniyad-sanadeedkii 2020-ka

Hargeisa, December 25, 2020 (W.H.M) - Golaha Wakiiladda Jamhuuriyadda Somaliland ayaa 26 December 2020 cod aqlabiyad ah ku ansixiyey Odoroska miisaaniyad-sanadeedka 2021-ka iyo lifaaqa soo-jeedimaha guddida dhaqalaha golaha wakiiladda.

Fadhigaas oo uu guddoominayey guddoomiyaha golaha wakiiladda Somaliland Md Baashe Maxamed Faarax ayey kasoo xaadireen 42 Xildhibaan, isla markaana waxa ogolaaday 27 Xildhibaan, waxaana diiday 5 Xildhibaan, halka ay 9 Xildhibaan ka aamuseen, Guddoomiyuhuna muu codaynin, isla markaana sidaas bay ansax ku noqday odoroska Miisaaniyad-sanadeedka 2021-ka ee JSL.

Sidoo kale odoroska Miisaaniyada sanadeedka 2021-ka ayaa 4.8% ka badan miisaaniyada sanadkan sii dhamaanaya ee 2020-ka, taas oo ah miisaaniyad-dhamaystiran, isla markaana cadadka miisaaniyadan ayaa wuxuu dhan yahay 2,881,916,764,333 (laba tiriiliyan iyo siddeed boqol laba iyo siddeetan bilyan), waxana ay oddoroska miisaaniyad sannadeedka dawladda dhexe ka badan tahay tii hore ee 2020, 2.7% halka wadarta guud ee miisaaniyduna ay tii 2020-ka badan tahay 4.8%, waxaanay mudnaanta siin doontaa miisaaniyaddan 2021-ku:

1. Amniga
2. Caddaaladda
3. CaaPmaadka
4. Waxbarashada
5. Wax-soo saarka
6. Deegaanka
7. Tamarta
8. Maamul wanaaga
9. Doorashooyinka
10. Ictiraafka

Sidoo kale odoroska miisaaniyad-sanadeedka 2021-ka ee goluhu ansixiyey oo ah miisaaniyad-dhamaystiran ayaa ka kooban lix qaybood oo kala ah:

- Dawladda dhexe
- Dawladaha hoose
- Hay'addaha madaxa-bannaan
- SDF
- World Bank
- JPLG.

Dhinaca kale Miisaaniyad sannadeedka 2021-ku waxay waafaqsan tahay qorshaha labaad ee qaranka, barnaamij siyaasadeedka xisbul-xaakimka Kulmiye iyo Maamulka Maaliyadda JSL ee PFM-ka, waana miisaaniyaddii soddonaad (30) ee uu yeesho dalka Jamhuuriyadda, Somaliland, taas oo loo gudbin doonaa golaha wakiillada Somaliland si ay uga gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah.



**Nuxurka Khudbadii Wasiirka H. Maaliyadda JSL U Jeediye
golaha Wakiiladda Oo Uu Kaga Warbixiyey Odoroska
Miisaaniyad-sanadeedka 2021-ka Oo Ah
Miisaaniyad-dhamaystiran**



Hargeisa, December 25, 2020 (W.H.M) - Halkan hoose ka daalaco nuxurka khudbadii uu Wasiirka Horumarinta Maaliyadda JSL Dr Sacad Cali Shire u jeediye xildhibaanda golaha wakiiladda Somaliland, kaas uu si qoto-dheer ugaga hadlay odoroska miisaaniyad-sanadeedka 2021-ka.

Khadbada wasiirka oo dhamaystiran ayaa waxay u dhignayd:-

“1. Hordhac

Mudane Gudoomiye, iyo Mudanayaal aniga oo ku hadlaaya magaca Wasaaradda maaliyadda oo gudanaaya waajibka Dastuurka qaranka qodobkiisa 55th farqadiisa 1aad iyo xeerka maamulka maaliyadda xeer No. 2016/75 qodobkiis 5aad, waxaa farxad ii ah in aan maanta oo taarikhdu tahay -8da bisha Diisambar 2020 idin horkeeno miisaaniyaddii 30aad ee dawladda ee sannadka -2021ka.

2. Diyaarinta Miisaaniyadda

Mudane gudoomiye, iyo mudanayaal, hawlaha culus ee wasaaraada maaliyaddu u xilsaarantahay waxaa ka mid ah diyaarinta miisaaniyadda. Oo leh habraac qaata illaa lix bilood. Sannadkan waxaanu talaabo talaabo u raacnay habraaca Xeerka PFM-ka ama nidaamka dib u habaynta maaliyadda, kaasoo na faraaya:

1	In la diyaariyo qoraal ku saabsan xaaladda dhaqaale ‘Budget Outlook paper’(May)
2	In guddida Siyaasadda miisaaniyadu qeexo waxyaabaha mudan iyada oo ka duulaysa Qorshaha Horumarinta qaranka NDPII(May)
3	In la dhiyaariyo, qoraal ku saabsan xaaladda dhaqaale ‘Macro economic and Fiscal Framework) sidday u ekaan doonto (waxsoo saarka, ganacsiga dibedda,ascaarta iwm) mudada dhow iyo ta dhexe (June)
4	In la sameeyo qaab dhismeedka miisaaniyadda (Budget framework) (June)
5	In la wargeliyo wasaaradaha iyo hay'adaha Diyaarinta iyo soo gudbinta Miisaaniyadda (July)
6	In talo wadaag lala yeesho Guddida dhaqaalaha ee golaha wakiilada(July)
7	In dood furan iyo wada tashi lala yeesho dadweynaha (July)
8	In hay'adaha iyo wasaaradaha mid mid looga wada hadlo Miisaaniyadda ay soo gdbisteen (September)
9	In miisaaniyadda lagu diyaariyo habka iswada SLFMIS
10	In Golaha wasiirada la hor keeno si ay u ansixiyaan (Sep)
11	In golaha wakiilada la hor keeno si looga doodo loona ansixiyaan (October)

3. Hantaaqooyinka iyo Saamaynta Dhaqaa-laha (pp1)

Mudane guddoomiye iyo Mudanayaal, miisaaniyadda sannadka 2021 ee aanu halkan idiinku soo gudbinaynaa waxay ka turjamaysaa xaaladda dhaqaale ee sannaadkan 2020 iyo odoroska

xaaladda dhaqaale ee 2021.

Sannadkani wuxuu ahaa sannad adag, Waxaa dhaqaalaha so gaadhad hantaaqooyin badan oo saameeyey miisaaniyadda sannadkan iyo ta soo socotaba: hantaaqooyinka waxaa ka mid ahaa

1	Covid19
2	Ayax
3	Xayiraada xajka
4	Xayiraada isu socodka
5	Iyo Xaaladda Ethiopia oo dhaqaale ahaan aad isugu xidhanahay

Hantaaqooyinkaas waxaa ka dhashay in:

		Isbarbardhiga J-S 2019 iyo 2020
1	Xoolaha dhoofa	%39- hoos u dhaceen J-S 2020
2	Qiiimaha alaabta dekedeheena kasoo degta	3.8- % hoos u dhacay
3	Tirada Containerada	11.8- % hoos u dhacay
4	Dadka madaarka Hargeisa ka soo degaayey	%60- hoos u dhacay
5	Sibidhka aynu soo dhoofsano	%18- hoos u dhacay
6	Qaadashada Liisamada ganacsi	%25- hoos u dhacay
7	Dakhligii la Plaayey in mudadaa uu inna soo galoo	7- % hoos u dhacay

Dhinaca kale waxaynu ku guulaysanay in aynu xakamayno sicirbararka iyo qiima dhaca shillinka J-S, xawaaladduna nasiib wanaag isma dhimin.

		2019	2020
1	Sicir bararka	5.6 (December)	6.2 (sept)
2	Sarifka	8,670 Jan 2020	8,650 (sept)
3	Xawaaladda	Korodh	%3.9 up

Waxa kale oo aynu guulaysannay in bil walba mushaharka la bixiyo bisha oo aan dhamaan

Waxaynu filaynaa in sannadkan uu yimaado hoos u dhac dhaqaale - 2-3%. Sannadka soo socdana dhaqaaluhu koro 1-2%.

Hoos u dhaca dhaqaale ee sannadkan 2020 mid innaka innoo gaara maaha ee waa mid caam ah. Hay'adda Lacagta ee aduunka ah ee loo yaqaano IMF waxay sadaalisay in dh-

		% isbedel
1	Wadamada soo koraaya	3.3- %
2	Wadamada horumary	5.8- %
3	Caalamka isku celcelin	4.4- %

4. Miisaaniyadda (pp 1)

Gudoomiye iyo mudanayaal:

Annaka oo xaaladda dhaqaale ee sannadkan iyo ka soo socda ka doolayna waxaanu miisaaniyadds sannadka 2021 ku soo ururinay sida ka muuqata shaxdan:

		2020	2021	% increase
1	Dawladda dhexe	2,046 billions	2,102 billion	2.7
2	Dawladda hoose	316	368	16.5
3	Hay'adaha madaxa banana	242	248	2.5
4	SDF	75	88	17.3
5	World Bank	56	64	14.3
6	JPLG	16	13	18.8-
	Total	2,750	2,882	4.8

Miisaaniyadda dawladda dhexe waxay ka badantahay tii %2.7 2020. Miisaaniyadda wadarta guudna waxay tii 2020 ka badantahay %4.8

5. Dakhliga (PP 19)

Miisaaniyaddu waxay ka imanaysaa:

		billions	%
1	Cashuurta Kastamyada	1,060	50.4
2	Cashuurta iibka	694	33
3	Cashuurta mushaharka	105	5
4	Cashuurta macaashal macaashka	39	2
	Cashuuraha kale	92	4.4
5	Dakhliga kale	112	5.3
	Wadar	2,102	

Cashuuraha Kastamka (PP 20)

	Kastamyada	2021	%
1	berbera	1091 billions	66.4
2	Kala Baydh	349	21.2
3	Zayla	95	5.8
4	Hargeisa Airport	40	2.4
5	Borama	20	1.2
6	Wajaale	19	1.2
7	Inta kale (14)	27	1.6
	Wadar	1642	

		2021	
	Hargeisa	252.2 billion	66.6
	Berbera	71.8	19
	Burao	17.9	4.7
	Borama	17.4	4.6
	Gebiley	8.9	2.4
	Erigavo	4.6	1.2
	Laas Aanood	3.6	1
	Zeila	1.4	0.4
	Caynabo	0.9	.2
		378.6	

6. Siyaasadda (pp 21) Miisaaniyadda 2021 waxay ku salaysantahay siyaasadahan:

1	Isu dheeli tirka dakhliga iyo kharashka
2	Xakamaynta sicir bararka (%6)
3	Ilaalinta qiimaha shillinka (8,500)
4	kor u qaadista saamiga cashuuraha beriga
5	Adkeynta amniga
6	Illaalinta cadaaladda
6	Dhiirigelinta wax soo saarka
7	Ilaalinta deegaanka
8	Shaqo abuurka – Shaqaalaha cusub ee dawladdu wuxuu ku dhowyahay (4,800)
9	Joogteyn ta mashruuca shaqo qaran
10	Maamul daadejinta iyo u dhamaystirka kabka (%12.5) dawladaha hoose
11	Joojinta cashuurta macaashal macaashka ee dekedda lagu qaado(%0.5)
12	Joogtaynta tacriifadda cashuuraha macaashal macaashka (%10), iisiga (%5), mushaharka (%6), iyo kirooyinka (%10)
14	Samaynta sanduuq dadka dhimirka qaba u gaar ah oo laga maal gelinaayo 200 sh. Oo loo saaro Kg. qaadka ah.
15	Fududaynta cashuur bixinta si loogu bixin karo Zaad iyo E-dahab
13	Joojinta lacagaha aan sharciga ahayn ee laga qaado cashuur bixiyaha
14	Midaynta hab xisaabeedka (Standard chart of accounts) dawladda dhixe, dawladaha hoose, iyo hay'adaha madaxa banaan
15	Daahfuraanta iyo isla xisaabtanka

1	Amniga
2	Cadaaladda
3	CaaPmaadka
4	Wax soo saarka
5	Deegaanka
6	Tamarta
7	Maamul wanaaga
8	Doorashooyinka
9	Wax barashada
10	Ictiraafka
11	Shaqo abuurka

8. Wadaagayaasha kharash (pp 24)

Mudane Gudoomiye iyo mudanayaal: Miisaaniyadda dawladda dhexe waxaa loo qaybiyaa 59 hay'adood iyo wasaaradood oo 10 wadaage loo qaybiyo . Sida ay miisaaniyadu u qaybsantahayna waa sidan. Kharashka miisaaniyaddu wuxuu ku baxayaa 2021 (PP 29-25)

1	Difaaca iyo amniga (10)	744 billion	%35.4
2	Maamulka (20)	423	%20
3	Dhaqaalaha (5)	311	%14.8
4	Wax barashada(3)	194	%9.2
5	CaaPmaadka (4)	110	%5.2
6	Kaabayaasha (4)	99	%4.7
7	Waxsoo saarka (2)	54	%2.5
8	Deegaanka (2)	29	%1.4
9	Biyaha (1)	24	%1.14
10	Tamarta (2)	14	%0.65
	Qaybaha kale	100	4.8

9. Qaybaha kharashka 2021 (PP 30)

Dhinac kale madaxyada ay miisaaniyaddo ka baxaysaa waa 8 madax oo kala ah:

1	Mushahar iyo gunooyin	1,085 billion	%51.6
2	Hawla socodsiin	567	%27
3	Mashaariic	150	%7.1
4	Dhismayaal iyo hanti maguurto ah	108	%5.2
5	Deyn	75	%3.6
6	Lama Plaan	62	%3
7	Kaalmooyin	49	%2.4
8	Kayd	5	%0.2

10. Hantida raagta ee Dawladdu maal gelinayso 2021 (PP 32-31)

Waxaa ka mid ah:

	dhismayaal	Jaamacado
		Iskuulo
		Xanaanooyin
		Buundooyin
		Ceelal
		Dekeda Maydh
		Bakhaaro keyd
	Gaadiid	
	Qalab	xaPis
		CaaPmaad
		Wax barasho
		Ciidan

11. Mashaariicda dawladuu maal gelinayso 2021 Waxaa ka mid ah

	Mashaariic	Waxbarasho
		CaaPmaad
		Shaqo qaran
		Beero
		Xoolo
		Deegaan
		Sahamin macdan
		Technolojiyad iyo booso
		Ciyaaraaha dhalinyaradda
		Wadooyin
		Doorashooyin
		Goobo wershadeed (industrial zones)

12. Mashaariicda Bangiga dunida 2021 (PP 33)

1	Dib u habaynta shaqaaalaha dawladda
2	Horumarinta korontada
3	Dib u habaynta maamulka maaliyadda

12. Mashaariicda Bangiga dunida 2021 (PP 33)

1	Dekeda Maydh
2	Wadada Berbera – Burao
3	Biyo ballaadhintaa Caasimadda Hargeisa
4	Ka hortaga nabaadguurka MJ
5	Biyo balaadhinta Borama
6	CaaPmaadka iyo tayenta xoolaha

14. Mashaariicda JPLG 2021(PP34)

Mashruucan waxaa maal geliya dawladda dhexe (%15), Dawladaha Hoose (%6), iyo hay'adaha UNta (%79). Waxaa sannadka 2021 laga hirgelinaya mashaariic 8da degmo ee:

1	Berbera
2	Borama
3	Burao
4	Gabeley
5	Hargeisa
6	Oodweyne
7	Sheikh
8	Saylac

15. Mashaariicda laga maalgeliyey Sanduuqa horumarinta Gobolad Bariga (%2) sannadka 2020

1	MCH	Kaladhac	Dhahar
2	MCH	Booda Cadde	Dhahar
3	Garadag university	Garadag	Sanaag
4	Tabca road	Erigavo	Sanaag
5	MCH	Laas Qoray	Sanaag
6	District commissioner of Pce	Laas qoray	Sanaag
7	Primary/secondary school	Laas Anood	Sool
8	Waste dumping pit	Laas Aanood	Sool
9	Nugal University	Laas Aanood	Sool
10	Football Peld	Caynaba	Sool
11	Police station	Fiqifuliye	Sool
12	District commissioner's of Pce	Fiqi fuliye	Sool
13	District commissioner building	Awr boogays	Sool
14	District commissioner's of Pce	Yagoori	Sool
15	Police station	Yagoori	Sool

16. Dawladaha hoose iyo Hay'adaha Madaxa banana 2021 (Volume II)

Mudane Guudoomiye iyo Mudanayaal waxaan markale halkan idiinku soo gudbinayaa miisaaniyadda Dawladaha hoose iyo hay'adaha madaxa banana oo faahfaahsan annaka oo ka duulayna qodobka 5aad farqadiisa 1aad

ee Xeerka, maamulka maaliyadda Qaranka Lr.2016/75.

17. Dawladaha Hoose 2021 Kharashka miisaaniyadda 2021 ee dawladaha hoose oo dhan 368 Billion Si.Sh. wxuu ku bixidoonaa sidan

1	libsiga adeega iyo alaabta	151 billion	%41
2	Mushaharka shaqaalaha	85	23.1
3	Dhismeyaasha	43	11.7
4	libsiga hantida ma guurtada ah (ex. Buildings)	38	10.3
5	Kaabis	37	10.1
6	Mashaariic	9	2.4

18. Hay'adaha Madaxa Banaan 2021

Miisaaniyadda hay'adaha madaxa banana oo ka kooban 10 hay'adood waxay dhantahay 248 billion Sl.sh. waxanay u qaybsantahay sidan:

Baanka dhexe	53 billion	21.4
Haamaha shidaalka	35	14.1
Madbacadda qaranka	40	16.1
Dekedda Berbera	33	13.3
Wakaaladda Biyaha Hargeysa	41	16.5
Wakaalada biyaha Burao	19	7.7
Wakaalada biyaha ee Borama	14	5.6
Wakaalada biyaha ee Berbera	8	3.2
Wakaalada biyaha ee Gebiley	4	1.6
Wakaalada biyaha ee Arabsiyo	1	0.4
	248	

19. Codsxi ansixin

Mudane Gudoomiye, iyo mudanayaal, waxaanu idin soo hordhignay miisaaniyad Faahfaahsan, oo lagu dhisay nidaamka maamul wanaaga maaliyadda, xambarsanna xog iyo siyaasad cad oo tafatiran, ka turjumaysa awoodeena, waafaqsanna himilooyinkeena iyo qorsheena qaran.

Waxay miisaaniyadani xoojinaysaa amniga, ilaalinaysaa cadaalada, daadejinaysaa maamulka, dhiiri gelinaysaa wax soo saarka. Wuxaan markaa idinka codsanaynaa, idinka oo ka gudanaya waajibaadkiina dastuuriga ah, in aad ansixisaan miisaaniyadda sannadka 2021".

CUTUBKA 5aad CASHUURTA SHAQAALAH

1. Waa maxay Cashuurta Shaqaaluhu?

Cashuurta shaqaalahu waxa weeye dakhli kasta oo shaqaale ka soo gala shaqo sida uu sheegay qodobka 70aad ee Xeerka dakhliga cashuuraha berrigu waxaan ka mid ah qadarada soo socda, ha lahaadaan dakhli ama raasamaal:-

- a. Xuquuq Maalmeed, Mushahar, lacagta fasaxa loo qaato, fasaxa la lacageeyo, lacagta wakhtiga shaqada ee dheeraadka ah, ajuurooyin, lacagta faa'iido wadaaga ah, xuquuq shaqo ka tegis, abaal marin, jid-mar, madadaalo,
- b. Qiimaha dheef kasta oo la hibeeeyay
- c. Qadar kasta ama magdhaw uu bixiyo loo shaqeeye,
- d. Qadar kasta oo lagu helo xuquuq heshiis shaqo oo wakhtiisiidh dhammaaday ha lagu muujiyo ama yaan lagu muujinin heshiishka xuquuqda noocaa ah ama lagu heli karo oo ah qadar u dhigma heshiska shaqo.



2. Yey ku waajibtaa cashuurta shaqaaluhu?

Qofkasta oo u hayashaqo qof kale oo uu ku helo dakhli Mushahar sugaran.

3. Miyaa layga cashuurayaagunnada?

Haa, Cashuurta Shaqaalahu waxa kale oo ay ku dhacaysaa: Gunnada Shaqaalaha.

4. Imisaa la bixiyaa cashuurta shaqaalaha?

Cashuurta Shaqaalaha waxaa la bixiyaa: boqolkii ba lix (6%).

5. Side loo bixiyaa cashuurta shaqaalaha?

Cashuurta Shaqaalaha waxaa loo bixiyaa: loo shaqeeyaha ayaa bil walba ka reebaya shaqaalahiisa cashuurta shaqaalaha; isagana bil walba geynaya xafiisyada cashuuraha berriga.

08 XOGSIDAHA CASHUUR BIXIYAH

6. Goormaa la bixiyaa cashuurta shaqaalaha?

Cashuurta Shaqaalaha waxaa lagu bixiyaa: bil-le ama wawa ay waajibaysaa bishii ba hal mar.

7. Xaggee lagu bixiyaa cashuurta shaqaalaha?

Cashuurta Shaqaallaha waxaa lagu bixiyaa: Xafiisyada Cashuuraha berriga ee dalka oo dhan gaar ahaan Xafiiska kuugu dhaw.

8. Haddii aan la habsaamo maxaa dhacaya?

Haddii aad la habsaanto Cashuurta Shaqaallaha waxaa dhacaya: Ganaax.

9. Waa may Ganaaxa cashuurta Shaqaalahu?

Ganaaxa Cashuurta Shaqaalahu waxa weeye: boqolkii ba laba 2%.

10. Yaa ka masuul ah cashuurta shaqaalaha?

Waxaa ka masuul ah loo shaqeeyaha waana in uu ka jaraa cashuurtakuwaajibtay mushaharkashaqaalahiisa isla markaana waa in uu xareeyaa wakhtigeeda.

11. Maxaa dhacaya haddii loo shaqeeyuhu

ka reebi waayo cashuurtii ku waajibtay
shaqaalahiisa?

Loo shaqeeyuhu haddii uu ku guul-daraysto in uu reebo cashuurtii shaqaalahiisa ku waajibtay isaga lafahaantiisa ayay saaran tahay bixinta cashuurtaasi, iyo ganaaxa sharcigu waajibiyay labadu ba.

La soco

Golaha Wakiilada JSL Oo Ansixiyey Kaabis-Miisaaniyaddeed (Supplementary Budget) -2019Ka Oo Ay U Soo Gudbisay Wasaaradda H. Maaliyaddu



Hargeysa, December 25, 2020 (W.H.M) - Golaha Wakiilada JSL ayaa kalfadhigiisii 44-aad, fadhogiisii 9-aad oo qabsoomay 6 december 2020-ka cod aqlabiyyad ah ku meel-mariyey ansixinta kaabis miisaaniyaddeed oo dhan 55.585 Billyan oo lacagta JSL ah (shan iyo konton billyan iyo shan boqol shan iyo sideedtan milyan sl.shll//), taas oo ka timid dhakhli dheeraad ah oo ay wasaaraddu soo saartay sanad miisaaniyaddeedkii 2019-ka. Kaabistan oo ah tii ugu horaysay ee abid loo gudbiyo Golaha, waxa lagu dabooli doonaa dhibaatooyinka dhaqaale, caapmaad iyo wax soo saar ee ay keeneen xanuunka COVID-19 iyo waxyeeladii ayaxa.

Sida uu dhigayo xeerka maamulka maaliyadda dalka xeer Ir.75/2016 qodobkiisa 9-aad, xubniiisa 1-aad iyo 2-aad oo sheegaya hadii uu soo baxo dakhli ama kharash dheeraadda oo aan ku jirin xeerkii miisaaniyadda ee la ansixiyey. In qoondada dakhli ama kharashka dheeraadka ah wasiirka wasaaradda horumarinta maaliyaddu u gudbiyo golaha dalab uu ku doonayo in la ansixiyo ku takrifalkeeda. Hadaba isagoo wasiirka horumarinta maaliyadda JSL Dr Sacad Cali Shire tixraacaya qodobada sharci ee kor ku xusan wuxuu warqad u qoray golaha wakiilada 17-kii bisha August/2020 uu kaga codsanayo meelmarinta kaabis-miisaaniyaddeed, iyadoo ugu danbayna goluhu fadhogiisii 6 December ku meelmariyey, waxaanay lacagtaasi wax ka tari doontaa is dhinkii ku yimid Miisaaniyyadda sanadka 2020-ka.

Kulan-Hawleedka Dejinta Qorshe-sanadeedka 2021-ka Ee Wasaaradda H. Maaliyadda JSL

Hargeisa, December 2020 ,25 (W.H.M) - Kulan hawleed Lagu Gorfaynayey Qorshaha -2021ka ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Somaliland oo sanad walba bisha u danbeysa ee December qabsooma ayaa -2020/12/20kii ka qabsoomay Magaaladda Hargeisa, iyadoo ay madashaasi qorshayaashooda kusoo bandhigeen waaxaha wasaaradda, xapiska dib u habaynta maamulka maaliyadda ee PFM iyo xapiska xisaabaadka guud ee qaranku.



”

Kulankaas oo lagu falanqaynayey qorshe hawleedka -2021ka, waxa sidoo kale lagu gorfeeyey qaabka ugu haboon ee Waax walba u fulin lahayd Qorshe-Hawleed keeda.



Sidoo kale Shirkan oo ahaa mid mihiimad wayn u leh wasaaradda horumarinta maaliyadda iyo Qarankaba waxa kasoo qaybgalay Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda, Dr Sacad Cali Shire, Wasiir-Xigeenka Md.Muuse Ibraahin Yuusuf (Salef), Agaasimaha Guud Md. Maxamed Cabdi Gurxan, Xisaabiyyaha Guud ee qaranka Md. Axmed Daa'uud Geedi, dhamaan Agaasimeyasha iyo ku xigeenada -14ka Waaxood ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Somaliland.

Dhinaca kale Wasiirka wasaaradda Horumarinta maaliyadda, wasiir ku xigeenka iyo agaasimaha guud oo madashaasi hadalo kooban ka jeediye ayaa iyagu dhamaantood ku dheeraaday mihiimada kulankaasi, iyagoo madaxda waaxaha wasaaradda kula dardaarmay inay si Pican u gutaan waajibaadada saaran, iyagoo tibaaxay in waax walba lagula xisaabtami doono qorshaha u dajisan.



Madaxwaynaha JSL oo ka hadlay muhiimada ay Qaranka u leeyihiin bixinta-cashuurta iyo isla-xisaabtanku



Burco, December 25, 2020 (W.H.M) - Madaxweynaha JSL Md Muuse Biixi Cabdi ayaa ka hadlay mihiimada ay qaranka u leeyihiin bixinta-cashuurta iyo ilaalinta iyo isla-xisaabtanka oo uu ku tilmaamay kuwo mihiimad wayn u leh qaranimada Somaliland.

Madaxwaynaha Somaliland waxa uu sidaasi ku sheegay mar uu 19- October 2020 khudbad ka jeediyey munaasibad ay ku qalinjabinayeen ardayda jaamacadda magaaladda Burco, isagoo halkaas madaxwaynuh kaga hadlay arimo badan oo door ah. Ugu horayna isagoo ka hadlayey sababta ay bulshaddu uga cago-jido bixinta cashuurta waxa uu yidhi "Su'aal Ayaan ka jawaabayaa sababta dadku cashuurta u diidaan? Anigaa kuu sheegaya sababta, waa laba sababood. Ninka baayac-mushtarka laba shay ayuu cashuurta u diidi karaa? Mid waxuu u diidayaa, waa Waddani wanaagsane, ninkaa loo dhiibayo ayaa cunni doona? Ninkaa loo dhiibayo darka gaadhsii maayee, jeebkuu ku ridanayaa. Dareen soo taxnaa muddo dheer, Sababta labaad waa ninka baayac-mushtarka inuu yahay gocor, bakhaylka-gocorkaa ka xun? gocorku xoolahiisa waxba kama cunno, dadka kalena waxba kama siiyo markaa ururi mooyee, wax soo bixi ayaa ugu darran, oo sadaqada iyo sakada midna ma bixiyo? Kaasina hawl ayuu u baahan yahay? Madaxweyne Muuse Biixi oo faahfaahin ka sii bixinayey talaabooyinka loo baahan yahay in la qaado si shacabka iyo ganacsatadu cashuurta u bixiyaan ayaa yidhi, "Labadaa shay ayaa laysku haystaa, mid shacab ahaan ayeynu u baahan nahay inaynu wax ka wada qabanno, maadaama dawladda la doorto nahay, waa in ninka loo dhiibo xoolaha qaranka, oo Madaxweynahu

ugu horeeyo, ilaa hoos lagu ilaaliyo oo lagula xisaabtammo inay qowl iyo pcil is waafajiyaa, oo ilaalinta xoolaha qaranka isugu tagno, arinkaas hadaan halkan ka ballanqaaday, waa inaad igu ilaalsaan".

Madaxweyne Muuse ayaa sheegay in hadii shacabka ama xisbiyadu sheegayaan dhaliil la xidhiidha xukuumadda noqoto mid dhab ah, oo caddeynteeda leh, isagoo ka hadlaya waxuu yidhi, "Markaad igu ilaalinayso, waxaad sheegayso waa inaad hubsataa. (Shakiga badankiisu waa dembi) aayad qur'aan ah weeye, oo culimadu inoo sheegto. Iska hubsada, waxaa la doonayaa intaanad warbaahinta iyo faceboog tegin, isweydii tollow ..Ina muraad, waxaa ma sameeyey, mise muu samayn? Haduu sameeyey ka waani oo ka qabo, xaq baad ugu leedahay, waa bani'aadmi khaldami kara? Hadii la hafrayo oo aanu qabinna, dee u hiili oo tus inaanay waxaasi dhicin".

Madaxweynaha oo gebagebadii u soo jeedinaya ardaydii Jaamacadda Burco iyo martidii ka soo qeybgashay xaßada talooyin ayaa yidhi, "Haddaynu labadaa helno oo iska ilaalinno, oo muujino waxii Qaran ahaan loo dhiibo inaynu sidday ahayd u marino cashuurta wuu bixinaya, waanu ogolaanayaa, laakiin, hadii la cunno ma bixinayaan. Ilaalinta cashuurta waynu u wada simman nahay, annagana xil gaar ah ayaa naga saran, inta Ilaahay SW nagu ogyahay waanu ka dedaalaynaa, inta kalena waynu ka wada tashanaynaa.

Muwadiin Wax ka Barro Noocyada Tacriifadaha

1.3.1.3 AJUURADDA RUQSADDA LIISANKA WERSHADHA

	Industries	Sole local	Sole foreign	Partner local	Partner foreign
1	Large Sized Factories	\$2,100	\$2,100		
2	Medium Size Factories	\$500	\$1000	\$3000	\$3600
3	Small Factories	\$250	\$300		
4	Industrial Registration Fee	\$200	\$500		

1.3.1.4 AJUURADDA DALXIISAYAASHA

	Citizen 1	Citizen 1 waxi ka badan	Foreign 1	Foreign 1 waxi ka badan
Tourism Site Visiting Fee	10 \$ Halkii qofba waa 10 \$	10 x (no. of tourist)	25\$ Halkii qofba waa 25\$	25 x (no. of tourist)

1.3.2 WASAARADDA MACDANTA IYO TAMARTA

1.3.2.1 AJUURADDA RUQSADDA LIISAMADA MACDANTA

	Liisanka Macdanta	Diwaan Galin	Cusboonaysiin
1	Prospecting(Muwaadin)	2,000,000/=	2,000,000/=
2	Prospecting(Ajanib)	\$2000	\$2000
3	Dealer	2,000,000/=	2,000,000/=
4	Mining(Muwaadin)	6,000,000/=	6,000,000/=
5	Mining(Ajanib)	\$5000	\$ 5000
6	Exclusive	\$ 2000	

1.3.2.2 AJUURADDA ROYALTYGA

1	Royalty (Gemstone)	5%	
2	Royalty (Semiprecious)	3%	

1.3.2. AJUURADDA LIISAMADA KORONTADDA

S/N	Nooca Cashuurta		
	Liisanka ppp	\$2000	
	Liisanka korontadda partnership	\$1500	
	Liisanka korontadda halka qof	\$600	

1.3.3 WASAARADDA XANAANADDA XOOLAHAY IYO HORUMARINTA KALUUMEYSIGA

1.3.3.1 AJUURADDA RUQSADDA LIISAMADA KALUUMEYSIGA

1	Liisamada Kaluumeysga	
1.1	Registration	600,000/= Markaliya
1.2	Licenses (new/ re-newel)	1,500,000/=

1.3.4 WASAARADDA CADAALADDA

1.3.4.1 AJUURADDA RUQSADDA LIISAMADA NOOTAA YOONIKA & QAREENADDA

S/N	NAME	Diwaan Galin	Cusboonaysiin
1	Public Notary	1,500,000/=	1,000,000/=
2	Qareen Guud	1,500,000	1,000,000
3	Qareen Shareeco	600,000	300,000
4	Qareen Ciqabeed	500,000	300,000
5	Qareen Ma'aduum	1,500,000	1,000,000
6	Qareen Meheriye	500,000	300,000
7	Real Estate	1,500,000	1,000,000
8	Liisan Ururada Qareenada	1,500,000	1,000,000
9	Liisanka Law Firm	\$500	\$ 315
10	NGO Ka Qaatay Ruqsadaha Wasaradda	1,500,000	1,000,000
11	Ruqsadda Turjumaada Sharci	1,000,000	500,000

La soco

Wasiirka H. Maaliyadda JSL Oo Daah-Furay Kulan-Hawleed ku Saabsan Dooda Hindisaha Qabyo-Qoraalka Xeerka Aaga Ganacsiga ka Caagan (Special Economic Free Zone Act)



Hargeisa, 2020 ,12 ,09 (WHM) - Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Dr. Sacad Cali Shire ayaa 2020/12/9 daah-furay kulan-hawleed ku saabsan xeerka aaga ganacsiga ka caagan (Special Economic Zone Act). Kulankaas ayaa waxa soo qaban-qaabiyyey xaPsiiska Xidhiidhinta Mashruuca Berbera Corridor.

Kulan-Hawleedkaas ayey ujeedadiisu ahayd sidii xildhibaanada Golaha Wakiiladda Somaliland loogu iftiimin lahaa muhiimadda xeerkani leeyahay, maadaama oo uu golaha hada horyaalo.

Waxa kale oo kulankaas kasoo qaybgalay Garyaqaanka Guud, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda, Maareeyaha dekadaha Somaliland, Guddoomiyaha Guiddida Dekadaha, Kusimaha Guddoomiyaha Guiddida dhaqaalaha ee Golaha Wakiiladda iyo xildhibaano ka tirsan Golaha.

Ugu danbayna waxa halkaasi xildhibaanada loogu soo bandhigay warbixin ku saabsan faa'idooyinka ay Somaliland u leeyahay meel-marinta Xeerka Aaga Ganacsiga ka Caagan (Special Economic Zone Act), iyadoo ay Xildhibaanada golaha wakiiladu halkaas suaalo ku waydiiyey wasiirka horumarinta maaliyadda Dr. Sacad Cali shire iyo Garyaqaanka Guud, isla markaana ay masuuliyiintaas uga jawaabeen dhamaan su'aalahaas, taas oo ka mid ah waajibaadka dastuuriga ah ee mudanayaasha Golaha Wakiilada inta aanay xeerka ansixinin.

Ugudanbayna, meel-marinta Xeerkan ayaa la ɻplayaa inuu door weyn ka qaadan doono soo jiidashada maalgashi caalami ah iyo sidoo kale adeegsiga Dekedda Berbera oo ku taala marin istiraataji ah.

Wasaaradda H. Maaliyadda JSL oo Daahfurtay barnaamijka Casriga Ah Oo Cashuur-bixiyayaasha U Sahlaya Inay Online Ku Bixiyaan cashuurta ku waajibtay



Hargeysa, December 25, 2020 (W.H.M) - Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL ayaa 12 October 2020 daahfurtay h barnaamij casri ah oo cashuurbixiyayaasha u sahlaya inay si fudud u bixiyaan cashuurta ku waajibtay iyagoo guryahooda ama goobahooda shaqo jooga, kuwaas oo hanaanka online-ka cashuurbixayaha ku bixin doona cashuurta.

Waxaan barnaamijkaas lagu soo bandhigay munaasibad si wayn loo soo agaasimay oo ay ka soo qaybgaleen Wasiir-Ku-Xigeenkha Horumarinta Maaliyadda JSL Mr Muuse Ibraahim Selef, Agaasimaha Guud ee wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Maxamed Cabdi Gurxan, Wasiirka Maalgashiga Maxamed Axmed Cawed, Wasiirka Deegaanka Shukri Xaaji Baandare, Wasiirka Cadaaladda Mustafe Maxamuud Cali, Wasiir-xigeenkha warfaaPnta Cabdinaasir, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Isgaadhsiinta, agaasimaha cashuuraha beriga iyo ku xigeenkiisa iyo ganacsato ka mid ah cashuurbixiyayaasha iyagu danaynayey adeegan cusub.

Ugu horayn Agaasimaha Guud ee wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Maxamed Cabdi Gurxan ayaa sharaxaad ka bixiyay muhiimadda system-ka casriga ah ee online-ka cashuurbixintawaxaanuyidhi, "Wasaaradda Maaliyaddu waxay wadaa barnaamij balaadhan oo dib loogu habaynayo hanaanka loo maamulo maaliyadda Qaranka. Waxa qeyb ka ah dib u habaynta maamulka cashuuraha.

Barnaamijkani wuu balaadhan yahay, gaar ahaan qeybta maamulka cashuuraha waxa laga gaadhad horumar balaadhan, taasoo keentay fududeynta cashuuraha kastamada iyo cashuuraha berriga.

Agaasimaha Guud ayaa sharaxaad ka bixiyey hawlo wasaaradu hore u soo qabatay, waxaanu yidhi, "Waxaynu hore u soo qabanay ood ogsoon tiihin oo xusuusinaya cashuurbixiyayaasha sharafta leh inaan dib u habaynku samaynay hanaanka diiwaangelinta cashuurbixiyaha, oo xogtiisa si fudud diiwaan rasmi ah loogu keydiyo.

Qorshahanayaa ah in loo sameeyo ganacsadaha

sumaduukagaduwanaadodhigiisa.

Agaasimaha Waaxda Cashuuraha Berriga oo hadal ka jeediyey ayaa sheegay inaan barnaamijkani ahayn mid cusub, waxaanu yidhi, "hawshani waa mid ka dhalatay dalabkiinii oo Rugta Ganacsigu noo soo gudbisay in bixinta cashuuraha loo fududeeyo cashuur-bixiyaha. Iyo jihadi Wasiirka Dr Sacad nagu amray inaan cashuur-bixiyaha u aqoonsanno macmiil.

Gacansatada dalka mid ka mid ah oo kulanka ka hadlay ayaa sheegay inuu soo dhoweynayo qorshaha Wasaarada Maaliyaddukufududeynayso hanaanka cashuur-bixinta, waxaanu hadalkiisa ka mid ahaa, "Hore waxaan aki jirnay askari, cashuur-bixiye iyo wasaarada maaliyada oo dagaal ka dhix socdo, laakiin hadii imika naloo aqoonsaday macmiil, oo cabashadayada la maqlayo, waanu soo dhoweynaynaa.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Isgaadhsiinta, Cali Cabdillahi Daahir oo kulanka ka hadlay ayaa sheegay in loo baahan yahay in adeegyada dawladu siiso bulshada in si elektronig ah ugu gudbiso, isla markaana adeegyada mudaawinka ama ganacsatadu uga baahato dawlada si fudud inuu ku helo.

Wasiir-xigeenka Warfaapnta Cabdinaasir Cumar Jaamac oo ka hadlay ayaa sheegay inay wanaagsan tahay in loo fududeeyo cashuur-bixiyaha hanaankii ay u bixin lahaayeen cashuuraha, waanan ku amaanayaa Wasaarada H Maaliyaha hawl-wadeenadeeda iyo madaxdeeda.

Wasiir-xigeenka warfaapnta Cabdinaasir ayaa sheegay in cashuurtu tahay wax aad naftaada ka qaadayso, naftaadana u qaadayso.

Wasiirka Cadaaladda Mustafe Maxamuud Cali oo kulanka ka hadlay ayaa amaanay dedaalo wasaarad maaliyadu samaysay, waxaanu yidhi "Maalmahan dambe waxaan arkaynay Wasaaradda Maaliyadda oo cashuur-bixiyeyaasha shahaahdooyin gudoonsiinaysa, oo tababaro siinaysa, iaydoo hore loo odhan jiray labadu waa col, isu-soo dhowaanshaha iyo is-fahamka ay yeeshen waxaan ku bogaadinaynaa wasaarada Maaliyadda.

Wasiirka Deegaanka Shukri Xaaji Baandare oo kulanka ka hadashay ayaa sheegtay in barnaamijka Wasaaradu waddo shaqaale badan ka faa'iidi doonaan, waxaanay tidhi, "Waxaan Playaa in

barnaamijkan dib-u-habaynta shaqaale badan ka faa'iidi doonaan, sababtoo ah dhalinyaro badan oo tiknoolajiga baratay ayaa loo yeedhanayaa. Wasiir Shugri ayaa sheegtay inay Playso in ganacsatadu dhalinyaro badan shaqaalayn doonaan, maadama ay aqoontii iyo farsamadii leeyahiin.

Wasiirka Maalgashiga Maxamed Axmed Cawed ayaa soo dhoweyey hanaanka Wasaarada Maaliyadu u casriyeynayso adeegyada ay bixiso, waxaanu yidhi, "Hore haddaynu u arki jirnay ganacsatada oo adeegyadooda casriyeeyaa, imika wasaarada Maaliyaduna way casriyeysay adeegyada ay siiso macaamiisheeda, waan ku hambalyeynayaa.

Wasiir-Ku-Xigeenka Horumarinta Maaliyadda JSL Mr Muuse Ibraahim Selef oo ugu danbayn khudbad ka jeediyey kulankaas lagaga Daah-Furka Hanaanka Online-Ka Ah Ee Cashuur-Bixinta ayaa sheegay inay fududeyn doonaan hanaanka cashuur uruurinta, isla markaana wakhtigan kuwa socda lagu bilaabi doono

Wasiir-xigeen Selef oo sharaxaad ka bixinayey siyaasad cusub ee Wasaaradda Maaliyaddu qaadatay, isla markaana culayska ka yareynaya shacabka ayaa yidhi, "Marka muddo la joogaba cashuuraha ayaa la kordhin jiray, balse siyaasada Wasaaradda H maaliyadda waa inaan cashuur-kordhin la samayn, balse aanu cashuuraha xilligan la qaado shacabka wada gaadhsiino.

Wasiir-xigeen Muuse oo faahfaahin ka bixinayey sababta ay siyaasadan cusub wasaarada Maaliyaddu u qaadatay ayaa yidhi, "Sababta aanu sidaa u samaynay waa inaan culayska ka yareyno shacabka, isla markaana dadkii aan hore cashuurta looga qaadi jirin u gaadhsiino, taasoo u baahan casriyeyn iyo fudueyn, wa aqeyb ka mid ah taasi, waxaanen lagu sii bilaabi doonaa cashuuraha imika la idiin sheegay ee iibka iyo cashuura mushaharka shaqaalaha.

Madaxwaynaha JSL Oo Si Qoto-dheer uga Hadlay Mihiimadda Barnaamijka Dib u habaynta Maamulka Maaliyadda Ee Wasaaradda H. Maaliyaddu Wado



Hargeysa, December 2020 ,25 (W.H.M) - Madaxwaynaha JSL Md Muuse Biixi Cabdi ayaa si qotodheer uga hadlay mihiimada uu Somaliland u leeyahay barnaamijka dib-u-habaynta maamulka maaliyadda Somaliland ee PFM-ka ee ay wasaaradda horumarinta maaliyaddu wado, kaas oo ay ka wada shaqeynayaan baanka aduunka.

Madaxwaynuhu waxa uu sheegay inuu barnaamijka PFM-ku fududaynayo isla-xisaabtanka isla markaana uu muujinayo daahfurnaan.

Sidoo kale Madaxwayne Muuse Biixi ayaa waxa uu tibaaxay in xukuumadda uu gadhwadeenka ka yahay laga rabo inay daahfurnaan u muujiso bulshadda si iyaguna taas badalkeeda si Pican ugu bixiyaan cashuurta.

Waxa uu sidaas ku sheegay madaxwaynuhu khudbad uu ka jeediyeey Shirweynahii Xisbiga KULIMYE ee October -2020 ,4kii ka qabsoomay Hargeisa, kaas oo uu si qoto-dheer ugaga hadlay muhiimadda Barnaamijka dib u habaynta

maamulka Maaliyadda Ee Wasaaradda H. Maaliyaddu wado, waxaanu yidhi "Waxaad maqashaan in badan barnaamijka dib-u-habaynta maamulka maaliyadda, oo Baanka Aduunku innaga caawiyo, barnaamijkaa hadaan soo koobo saddex qodob ayuu inoo fulinaya. Marka koowaad, in dhaqaalaha Qaranka noqdo mid daah-furnaan, oo saxaBga, qofka xog-uruurin (Research) samaynaya iyo qofka u baahan uu mid walba arki karo sida loo maamulo, oo aanu noqon wax Madaxweyne, Wasiirka Maaliyadda, ama nin kale jeebka ku haysto, oo qarsan karo. Xaq baa naloogu leeyahay inaad tidhaahdaan miisaaniyadii siday u baxday, halkay martay, taas oo daah-furan ayaa la wadaa.

Madaxweyne Biixi ayaa sheegay si loo gaadho hadafkaa daah-furnaanta maaliyadda dalka in loo marayo nidaamyada caalamiga, waxaanu yidhi, "Si taa loo helo shuruucda ka sokow, inay marto qaabka tiknoolajiyada casriga cusub, oo shaashada uga muuqato qof walba, iyo qaabka miisaaniyadda loo diyaarinayo, dawladu

waxay ku socotaa waa dhaqaalaha shacabka iyo Qaranku leeyahay, oo laga rabo qof walba waxii ku waajibay, in si daah-furnaan ah looga helo. Mar uu ka hadlayey Madaxweyne Muuse dhibaataada ka taagan ka qaaditaanka cashuurta ee shacabka ayaa yidhi, "Cashuur-bixiyahu waxuu ka shakisan yahay nimankan dawlada ee halkan fadhiya, waa niman shaqeysanaya, oo qaran uma maqnee, yaanay waxoogaaga kaa qaadin? Xukuumada waxa laga rabaa inay u muujiso cashuur-bixiyaha inaan laga danneysanayn, ee cashuurta laga qaado Qaranka lagu maamulo, oo tusto iyadoo cad oo la soo hordhigay Qaranka, sida sannad walba baarlamaanka loo soo

hordhigo."

Madaxweyne Muuse oo ka sii hadlayey nidaamka dib-u-haybta maamulka maaliyadda ayaa sheegay inuu inta ku soo koobayo maadama uu yahay mashruuc aad u balaadhan oo muddo tobantannadood socday, waxaanu intaas raaciyeey Madaxwaynuhu "Dawladii hore ee KULMIYE ayaa bilowday, annaguna weli waanu wadnaa, waxaanan rajaynayaa inuu sii socdo".

Wasiirka H. Maaliyadda JSL Oo xadhiga ka jaray xafis ay Waaxda Cashuuraha Berrigu ku yeelan doonto xarunta rugta ganacsiga Somaliland

Hargeysa-October -2020 ,27(WH) Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Dr. Sacad Cali Shire oo uu weheliyo Wasiir-Xigeenka Wasaaradda Md. Muse Ibraahim Yuusuf ayaa 27 October -2020kii xadhiga ka jaray xapisi ay Wasaaraddu ku yeelan doonto xarunta Rugta Ganacsiga Somaliland.

Ujeedada xapiskan loo yagleelay ayaa ah sidii ganacsatada loogu soo dhaweyn lahaa adeegyada ay uga baahan yihin Wasaaradda, waxa xusid mudan inaanu ahayn xapisi lacag-qabasho balse uu yahay xapisi u qaban doona ganacsatada adeegyada ay ka midka yihin diwaangalinta, xogsinta iyo adeegyo kale.

Agaasimaha Waaxda Cashuuraha Berriga oo xabada ka hadlay ayaa sheegay inaanu xapisku ahayn mid lacag qabasho, balse lagu kobciyano xidhiidhka cashuur-bixiyaha, waxaanu yidhi, "Ujeedada xapiskan maaha mid lacag qabasho, balse waa mid lagu kobcinayo xidhiidhka cashuur-bixiyaha. Waanu uga mahadcelinaynaa Rugta Ganacsiga, ooh ore aanu ugala xaajoinay furitaankiisa. Xapiskani waa xog-siin cashuur-bixiyaha, isla markaana dhamaan warbixinaha, shuruucda iyo nuqlada rasmiga ee wasaarada maaliyadda ka soo baxa uu ka heli karo.

Agaasimaha ayaa sheegay in maadama Rugta Ganacsigu tahay albaabka ganacsadahu markuu bilaabayo ganacsiga ka soo gelayo, ee iska diiwaangelinayo, intaanu liisamada wasaaradaha kala duwan ka qaadan, ayaanu uuga faa'iideynay

ganacsadaha inuu xogahii cashuuraha halkan ka helo, "Xapiskani hawlahu muhiimka uu qabanayo wax aka mid ah diiwaangelintii cashuur-bixiyaha ee aqoonsiga uu ka qaadanayo, macluumaad iyo buugaag badan oo u sahli doona cashuur-bixintana waanu keenay.

Gudoomiyaha Rugta Ganacsiga Jamaal Caydiid Ibraahim oo hadal ka jeediye ayaa sheegay in ganacsatada iyo wasaarada maaliyadu leeyahiin xidhiidh dhow oo wada shaqeyneed, waxaanu yidhi, "Wasaaradda Maaliyadda iyo ganacsatada waxa ka dhexeeya xidhiidh dhow oo wada shaqeyneed, hadday tahay shuruucaha ka soo baxa Wasaaradda ee la fulinayo, hadii ay jirto cabasho ka timaada ganacsatada oo Rugta Ganacsigu tahay birijka isku xidha laboododa, markaa hadii ganacsatadu hagaagto Wasaarada Maaliyadduna way hagaagaysa oo dakhligeedu wuu badanayaa, hadii Wasaaradu hagaagtana, dalka iyo dhaqaalahu wuu inoo hagaagayaa. Wasiir-xigeenka Maaliyadda Md. Muse Ibraahim Yuusuf oo hadal ka jeediye ayaa sheegay inay ku faraxsan yihin furitaanka xapiska cusub iyagoo ganacsatadu goobjoog ka tahay, waxaanu yidhi, "Mudooyinkan waxaanu wadnay nidaamkii aanu cashuur-bixiyaha ugu fududeyn lahayn adeegyada, si aanay xapisyoo durugsan ugu doonan, waxaanu hore uga soo furnay Wasaaraddo kala duwan iyo laanta socdaalka, dhamaan dedaaladaasi waa kor u qaadka adeega cashuur-bixiyeyaasha.

Wasiirka Horumarinta Maaliyadda Dr Sacad Cali Shire oo si rasmi ah xadhiga uga jaray xaPsiaka cusub ee Wasaaradu ku yeelatay Rugta Ganacsiga ayaa ka hadlay muhiimada uu leeyahay, waxaan hadalkiisi ka mid ahaa, "Waxaynu halkan ku daah-furaynaa xaPsiis Wasaaradda Maaliyaddu ku dhex yeelatay oo martigelisay Rugta Ganacsiga, markaa si gaar ah ayaan uga mahadcelinaynaa Rugta Ganacsiga iyo Ganacsatada-ba.

Dr Sacad ayaa sheegay in guud ahaan furitaanka xaPsiiskani qeyb ka yahay maamul-wanaaga, ujeedadiisuna waa in ganacsatada iyo wasaaradu si fudud isku soo gaadhaan, oo noqdo udub-dhexaad xog kasta oo ganacsaduhu uga baahdo wasaarada ka ogaan karo, kana heli karo, wasaaraduna ugu gudbiso xogta lagama maarmaanka u ah in la gaadhsiyo ganacsatada oo gaadhsiiso.

Wasiirada Horumarinta Maaliyadda Iyo Gaadiidka JSL Oo Si Wada Jir Ah Xadhiga Uga Jaray Xafiis Fududayn Doonna Adeegyada Buugta Gaadiidka Iyo Balaydhada Luma



Hargeysa, December 2020 ,25 (W.H.M) - Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Dr. Sacad Cali Shire oo uu wehelinayo Wasiirka Wasaaradda Jidatka iyo Gaadiidka Md. Cabdilaahi Abokor Cismaan ayaa -26kii October 2020 ayaa xadhiga ka jaray xaPsiis fududeyn doona adeegyada buugta gaadiidka iyo balaydhada luma, xaPsiiskan ayaa noqonaya mid lagu qabto adeegyo markii hore laba meelood oo kala fog loo tagi jiray, taas oo ay dadweynuhu culays kala kulmi jireen.

Masuuliyiinta labada wasaaradood ayaa ku booriyey cidii uu ka dhacsanyahay Liisanka wadida gaadiidku inay cusboonaysiistaan, iyadoo dhawaana la bilaabi doono obole lagu dardargalinayo cusboonaysiinta liisamada gaadiidka.

Waxaana xusid mudan in qofkasta oo laga bedelayo liisankii hore ee buuga ahaa laga kansali doono kaa hore ku cusubna la siin doono iyadoon laga qadayn kiisii hore, maadaama uu yahay dhumenti qofeed, waxaana sidoo kale loo sheegayaa dadkii laga xareeyey liisamadii hore inay doonan karaan waa qofkii u baahda e.

Sidoo kale xaPsikaas ayaa noqon doona mid lagu qabto adeegyo markii hore meelo kala fog loo tagi jiray ayaa imika goob kaliya laga wada heli doonaa, taas oo ay dadweynuhu culays kala kulmi jireen.

Munaasibadaas xadhig ka jarista oo ka qabsoontay xarunta Wasaaradda gaadiidka ayaa waxa kasoo qaybgalay Wasiiradda Horumarinta Maaliyadda Gaadiidka, Wasiir ku Xigeenka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda, Agaasimayaasha Guud ee Horumarinta Maaliyadda iyo Gaadiidka iyo Agaasimaha Waaxda Cashuuraha Berriga iyo ku xigeenkiisa.

Buug-yaraha Miisaniyadda Muwadiinka Somaliland 2020

Cashuuraha aasaasiga ah wax aka mid ah:

Cashuuraha Gudaha ee Aasaasiga ah	Maxaa la Cashuurayaa	Xaddiga/Heerka Cashuurta
Cashuurta Dakhliga Ganacsiga	Dakhliga la cashuuri karo: Waxa loola jeedaa faa'iidada guud oo lagu daray dakhliga ka soo hoyda hantida, maalgelin ama ilo kale oo laga jaray khasaaraха iyo kharashaadka	Sannadla 10%
Cashuurta Dakhliga Shaqaalaha (cashuurta mushahaarooyinka)	Dakhliga ka soo gala shaqaalenimada oo ay ku jirto mushahaarooyinka	Bille, 6%
Cashuurta agabka iyo adeegyada (GST)	Agab ama adeg (sida agab la warshadeeyey, la soo dejiyey, bixinta koronta, isgaadhsinta, hudheellada la seexdo iyo kuwa wax laga cuno, safarrada caalamiga ah iyo adeegyada safarrada	5%
Cashuurta Dakhliga Kirooyinka	Dakhliga kirooyinka hantida rigliga ah ee aan dhaqaaqin	Sannadle 10%

Horumarin iyo dib-u-qaabayn ayaa lagu samayn doonaa maamulka cashuurahan sannadka 2020. Waxa ahmiyad gaar ah la siin doonaa sidii loo ururin lahaa cashuuraha dakhliga ganacsiga si daahfur, caddaad-lad ah oo karti leh. Halka laga kordhin lahaa cashuuraha ganacsiga, dawladdu waxa ay maalgelin ku samaynaysaa kastammada si loo sugo ammaankooda, kartidooda iyo hufnaanta u-adeeggooda ganacsiga soo gelaya am aka baxaya Somaliland.

Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu waxa ay isku hawlaysaa ku-wargelinta cashuur-bixiyaha iyo ganacsatada xuquuqdooda iyo waajibaadkoodaba, waxana ay kala tashanaysaaa isbeddellada ku imanaya cashuuraha iyo kastammada.

SIDEE SI KA SII WANAGSAN LOOGU MAAREEYAA MAALIYADDA DAWLADDA?

Si ceeb la' oo loo maareeyo maaliyadda dawladdu waxa uu door halbowle ah ku leeyahay hirgelinta meelaha mudnaanta ay siisay miisaaniyaddu. Si loo taageero aragtidan, waxa Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu daahfurysaa Nidaamka Maaraynta Xogta Maaliyadeed ee Somaliland (Somaliland Financial Management Information System) oo laga hirgelin doono hay'adaha dawladda oo dhan si ay ula socdaan ugana warbixin karaan miisaaniyadahooda. Tijaabooyin lagu guulaystay ka dib, musharasiinta shaqaalaha ayaa isaguna noqon doona mid ka karti badan oo ka hufan kan hadda iyada oo si iyadu iswadda (automated) loo bixin doono sannadka 2020.

Somaliland waxa ay u baahan tahay inay ahaato mid diyaar u ah lama-fillaannada taban sida abaarahay iyo duufaannada. Dawladdu waxa ay diyaarinaysaa sanduuq lama-fillaannada lagu maareeyo, iyada oo lagu bilaabayo SISHS 5 bilyan. Waxa lagu dari doonaa 1% oo ah wadarta miisaaniyadda ee guud sannadaha ka dambeeya oo dhan.

HIRGELINTA CASHUURAHA IIBKA LA SOCDA

Cashuuraha iibka la socdaa ee xakamayntu waxa ay ku waajibaan agabka la warshadeeyo, kan la soo dejijo ee aan daruuriga ahayn iyo agabka waxtarkiisu yaryahay ama taban yahay. Cashuurahan ayaa raaci doona qiiimaha cashuurta lagu bixiyey ee agabka la soo dejiyey ee halkan ku qeexan laga bilaabo 1da January 2020. Wuxuu xusid mudan in heerarka cashuurta ee la soo jeediyey uu hadda ka yar yahay kan ku xusan Xeerka Dakhliga iyada oo sannadaha dambe si tartiib ah loo kordhin doono iyada oo lagala tashanayo daneeyayaasha ay khusayso.

Agabka la Cahuurayo	Heerka Cashuurta
Tubaakada iyo wixii la hal maala oo ay ku jiraan Sigaarka duubaan, sigaarka caadiga ah, Tubaakada la cabbo iyo tan la calashadoba	5%
Agabka la isku qurxiyo ee ay ka midka yihii cadarrada, indha-kuusha, xamuuradaha, iwm.	5%
Cabitaanka aan aalkolada lahayn ee ay ka midka yihii sharaabka khudradda iyo khudaarta laga sameeyo, cabbitaanka tamarta, kuwa soodhaha leh iyo kuwa heedda leh	10
Baabuurta raaxada, oo loola jeedo gaadiidka sida gaarka ah loo leeyahay oo awoodda hinjiinkiisu gaadhayo 4000cc am aka badan, qiihiisuna gaadhayo US\$20,000 ama ka badan	10%
Dahabka, Maarta, Macdanta iyo Saacadaha	10%

SARGOYNTA HEERKA SARRIFKA LACAGAHA QALAAD

Dawluuddu waxa ay ka kordhineysaa heerla sarrifka lagu cashuuro qaadka la soo geliyo waddanka SI.Shs 6,000 iyada oo laga dhigi doono SIShs 7,000 halkii Doolar ee Maraykan ah si loola simo heerka sarrif ee agabka kale ee la soo dejijo lagu dhaqo.

CASHUURAHA OO LAGA DHIGO KUWO SI SAHLAN LOO BIXIN KARO

Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu waxa ay bartilmaameedsanaysaa sannadka 2020 inay cashuur bixiyaha u fududayso diiwaangelinta iyo bixinta cashuuraha. Wuxuu gacanta lagu hayaa nadaam cashuur-bixiyuhu moobilkiisa ama nidaam kale oo elektarooniko ah uu ku bixin karo cashuurta isaga oo adeegsanaya Lambarka Aqoonsiga Cashuur-bixiyaha (Taxpayer Identification Number). Wuxuu kale oo Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda yool u ah sannadka 2020 inaan cashuur bixiyaha la saarin cashuuro iyo adeegyo ka baxsan sharciyadda.

Meelo badan ayaa durba horumar laga sameeyey: in cashuur-bixiyuhu isagu cabbiri karo cashuurta ku waajibtey, sida mushahaarooyinka, agabka iyo adeegyada iyo cashuurta dakhliga - taas oo u sahlaysa inuu xereeyo wixii ku waajibay. Cashuur-bixiyuhu, waxa kale oo u fududaanaysa inuu caddeeyo agabka u soo degey. Wasaaraddu waxa kale oo ay dejisey oo daabacday shuruuc hagaya cashuur-bixiyaha iyo ganacsatada.

Cashuur-bixiyaha ku diiwaan gashan Lambarka Aqoonsiga Cashurbixiyuhu waxa uu heli doonaa adeegyo dheeraad ah, la talin iyo taageero. Meheraduhu waxa ay u baahan doonaan Lambarka Aqoonsiga si ay u helaan caddayn cashuur-bixineed ama u gudbiyaan qandaraas dawladda ay ka rabaan ama loo siiyo kharash ay kaga yeeshen dawladda agab ay ka iibiyeen ama adeeg ay u qabteen, si ay u cusboonaysiyyaan ruqsadahooda ama si ay uga soo dejyaan ama uga dhoofiyaan agab Somaliland.

Wixii su'aalo ama toyasho ah ee la xidhiidha sida cashuur-bixiuu u noqdo mid ku quman oo la jaanqaada naadaamka, waxa la sameeyey lambar xilli walba furan oo ah 3535; haddii kale waxa cashuur-bixiyuhu soo boogan karaa xafiiska taagerada xogta iyo caawimada arrimaha la xidhiidha cashuuraha oo laga heli karo degellada Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda.

Dhamaad.....

Wasiirka H. Maaliyadda JSL Oo Xadhiga Ka Jaray Qaybo Cusub Oo Lagu Soo Kordhiyey Gegida Dayuuradaha Ee Cigaal

Hargeysa, December 2020 ,25 (W.H.M) - Wasiirka Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Dr. Sacad Cali Shire oo ay weheliyaan Wasiir-Xigeenka Wasaaradda Md. Muuse Ibraahim Yuusuf (Selef), Taliyaha Laanta-Socdaalka Sareeye Guuto: Maxamed Cismaan Caalin, iyo Maareeyaha Hay'ada Madaarada Kabtan: Cabdi Maxamed Rodol ayaa si wada jira xadhiga uga jaray 02 november -2020 kii qaybo cusub oo lagu soo kordhiyey Kastamka iyo guud ahaan Gegida Dayuuradaha Caalamiga ah ee Cigaal.

Qaybaahas cusub ee lagu soo kordhiyey Kastamka ama Garoonkaba guud ahaan waxa ka mida; dhismaha 18 xāpis oo ay adeegsan doonaan Ciidamada Laanta-Socdaalka iyo hawl-wadeenada Kastamka Madaarku, dhismaha qaybta kaydka dhokumentiyada, dayactir lagu sameeyey mid kamida bakhaarada lagu kaydiyo badeecaddaha iyo xāpiska khasnada, waxa lagu rakibay qalabka dabka lagaga hortago qaybaha dhoofka iyo halka laga soo dego, bakhaarada lagu keydiyo badeecaddaha, qaybaha laanta-socdaalka iyo dhawrista-tayada. Waxa sidoo kale kamida wax yaabaha lagu soo kordhiyey

Gegida Dayuuradaha Cigaal, dabgalin koronto oo leh awood laysku halayn karo taas oo dab sugar siin doonta aaladaha wax lagu baadho iyo qaybooyiayaasha lagu keydiyo daawooyinka, cutooyinka, cabitaanada iyo waxyaabaha kale ee dareeraha ah. Wuxuu wax weyn laga qabtay agabka fududeyn ta adeeg-bxinta Kastamka sida; mishiinada fudud ee lagu qaado badeecaddaha kala duwan, aaladaha lagu kor-joogteeyo alaaboooyinka ku keydsan bakhaarka, waxa sidoo kale xusid mudan in markii ugu horaysay laga hirgaliyey Kastamka Madaarka Cigaal ee magaalada Hargeisa hanaanka is wada ee lacag qabashada ee SAD (Single Administration Document), kaas oo ay ganacsatada iyo safrayaashuba lacagaha ku waajibay si sahlan ugu bixin karaan, iyo waliba hanaanka elektarooniga ah ee kaydinta xogta bakhaarka (warehouse data base).

Ugu danbayna waxa wax ka bedel baaxad leh lagu sameeyey hanaanka adeeg-bixinta Kastamka ee dhooqnta, soo dejinta, maaraynta badeecaddaha, shaqada iyo shaqaalah, iyo daryeelka macmiilka.

Dar-Dar Galinta Hawlaha Casriyeynta Xisaab-Xidhka Iyo Guud Ahaan Barnaamijka Dib-U-Habaynta Maamulka Maaliyadda Dalka



yagleelay xāpis u gaara fulinta hawlahaas, waxa la dajiyey oo la meel-mariyey xeerarkii lagu hagi lahaa barnaamijka, waxa dib loo qaabeeyey qaab-dhismeedyada waaxaha iyo qaybaha Wasaaradda Maaliyadda si ay ula jaan-qaadaan barbaamijkan, waxa la qalabeeeyey xāpisyada maamulka iyo lacagta iyo xisaabiyyaasha Wasaaradda, Hay'adaha Dawladda iyo Ciidamada qalabka sida, waxaana tababaro la siiyey guud ahaan saraakiisha iyo hawl-

Hargeysa, December 2020 ,25 (W.H.M) - Wasaaradda H. Maaliyadda JSL waxa ay sanadihii u danbeeyey ku hawlanayd meelmarinta casriyeynta maamulka maaliyadda Dalka guud ahaan, iyada oo la wadeenada ku shaqo leh lacagaha. Waxa xusid mudan in maanta guud ahaan Wasaaradda, Hay'adaha iyo Ciidamaduba u adeegsadaan hanaan electronic ah oo iswada isticmaalka miisaaniyadda sida; bixinta kharashaadka, xisaab-xidhada, iyo waliba xaraynta dakhliga. Xāpiska Xisaabaadka Guud ee Dawladda ayaa ka mid ah xāpisyada laf-dhabarta u ah hawlaha uu koobsanayo barnaamijka maamulka maaliyadda Dalku, waxaanu xāpisku markii u horaysay si

rasmi ah xisaab-xidhka ku samayn doonaa hanaanka is wada ee maaraynta xogta maaliyadda, taas oo u fududayn doonta Hanti-Dhawraha Guud hawlahaa la xidhiidha dabagalka iyo baadhisaha. Hadaba, si loo dardargaliyo fulinta hawlihii uga qorshaysnaa XaPIiska Xisaabaadka Guud sanadkan gabagabada ah ee -2020ka hawshan casriyeynta xisaab-xidhka iyo guud ahaan barnaamijka dib-u-habaynta maamulka maaliyadda Dalka, waxa subaxnimadii 23 November 2020 kormeer uu ugu kuur galayo hawlahaa ku tagay xarunta XaPIiska Xisaabaadka Guud Wasiir-Xigeenka Wasaaradda Md. Muuse Ibraahim Yuusuf (Selef), halkas oo uu Xisaabiyaha Guud ee Dawladdu Md. Axmed Daauud Geedi war-bixino ka siiyey halka ay ilaa hada wax u marayaan, Wasiir-Xigeenka iyo Xisaabiyaha Guud ayaa mid-mid ula kulmay madaxda qaybaha XaPIiska, iyada oo uu masuul kastaa ka war-bixiyey wax yaabaha uga qabsoomay hawlihii loo xilsaaray, hawlahaa taagan, caqabadaha jira iyo guud ahaan arimaha la xidhiidha shaqooyinka ay u idmanyihii.

Inkasta oo aynu nahay wadan curdin ah, dhaqaaliiisu koobanyahay, isla jeerkaasna aan wali aqoonsi, iyo taageero dhaqaale oo la sheegi karo ka helin bulshada caalamka, hadana taas macnaheedu maaha inaynu gacmaha laabano, oo aynu ku sii shaqayno hanaankii duuga ahaa ee xisaab xidhka iyo baadhisaha loo samayn jiray, balse taa bedelkeeda waxa inoo qabsoomay oo aynu ilaa hada meelmarinay dejinta iyo fulinta dhabaha casriyeynta maamulka maaliyadda, taas oo la jaan-qaadaya kuwo laga adeegsado dunidan casriga ah, ugu danbayna ujeedada loo saanyaday hanaankan dib-u-habaynta ayaa daarran sidii kor loogu qaadi lahaa isla xisaabtanka, daah-furnaanta, iyo guud ahaan maamul-wanaaga maaliyadaa Dalka.

Mihiimadda Xafisyyadda Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Ka Furatay Wasaaraddaha Cadaaladda Iyo Hawlahaa Guud Iyo Waliba Laamaha Bangiga Dawladda



Hargeisa 25,Dec2020- (WHM)- Wasiirka Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Dr. Sacad Cali Shire oo ay weheliyaan wasiir-xigeenka wasaaradda Md. Muuse Ibraahim Yuusuf, gudoomiyaha baanka dhexe Md. Cali Ibraahim Baqdaadi, xisaabiyaha guud ee dawladda Md. Axmed Daauud Geedi, iyo agaasimaha bangiga dhexe Md.Axmed Xasan Carwo ayaa si wada jir ah xadhiga uga jaray -2020/12/14kii laba xapnis oo xapiska xisaabaadka guud ku yeelanayo gudaha laanta -2aad ee farasmagaalaha Hargeisa iyo laanta -3aad ee dunbuluq ee bangiga dhexe dawladda, xapnisadan oo hubin ku samayn doona dakhliga ka hor intaan la xarayn, talaabandan ayaa meesha ka saaraysa culays iyo habisan ku iman jiray dakhli xaraynta dawladda maadaama XaPIiska Hubinta Dakhliga Xisaabaadka iyo Bangigu meelo kala durugsan ku yaalaan.

Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL iyo Agaasimayaasha Guud ee Wasaaraddaha Hawlaha Guud iyo Cadaaladda ayaa sidoo kale si wadajira xadhiga ugajaray xafiis oo ay Waaxda Cashuuraha-Berriga Wasaaradda H. Maaliyaddu ku yeelan doonto gudaha Wasaaraddaha Cadaaladda iyo Hawlaha Guud. Xafiisyadan ayaa halkaa ku qaban doona dakhliga ka soo xarooda kirada guryaha iyo nootaayooyinka, iyadoo ujeedaduna tahay sidii adeegyada maaliyadeed ee Dawladda loo fududaydin lahaa, is la markaana loo mataanayn lahaa hawlaha is le balse Hayado ama xafiisyo kala duwan la xidhiidha.



Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Tababar Mihiim Ah U Soo Xidhay 35 Xubnood Ka Kala Socday Hantidhawrka Gudaha Ee Wasaaradaha Iyo Hay'adaha Dawladda Somaliland



Ogaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Md. Maxamed Cabdi Gurxan ayaa 25 December 2020 tababar u soo xidhay 35 xubnood oo kamid ah hanti-dhawrka gudaha wasaaraddaha iyo hay'adaha dawladda, tababarkan oo u socday saraakiishan mudo 3 cisho ah, waxay ku qaadanayeen hanaanka caalamiga ah ee loo diyaariyo warbixinaha hantidhawrka-gudaha (Internal Audit Report Best Practice), waxaana sidoo kale kulan-hawleedkan sedexda cisho qaatay lagu jaangoynayey sidi ay Hay'adaha Dawladdu u raaci lahaayeen qaab-warbxineed isku mid ah.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda Md. Gurxan ayaa gunaanadkii munaasibada hadalo dardaaran ah siiyey saraakiisha loo soo xidhay aqoon korodhsiga, isagoo carabka ku adkeeyey inay aqoonta ay qaateen ku dabaqaan hawl-galadooda baadhiseed, is la markaana daacad ka noqdaan gudashada waajibaadkooda shaqo.

